



Täältä töihin / [liveopisto.fi](https://www.liveopisto.fi)

# Tababarka TELMA

Tababbarka TELMA waxaa loola jeedaa tababar kuu diyaarinaya shaqo iyo nolol madaxbannaan.

Tababarka TELMA waxaa lagu bartaa xirfadaha maalin kasta looga baahan yahay guriga iyo shaqada, iyo sidoo kale barashada la shaqeynta bulshada. Tababbarka kadib, ardaygu wuxuu heli karaa shaqo u dhiganta awooddooda.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada ka akhriso boggayaga oo af-finnish ku goran: <https://www.liveopisto.fi/hakijalle/telma-koulutus>

## Yaa adeegaan loogu tala ogoley?

Waxbarashada shaqada iyo nolosha madaxbannaan waxaa loogu talagalay ardayda u baahan taageero gaar ah oo ballaaran.

## Baaxadda iyo qaabdhismeedka tababarka

Baaxadda tababarku waa 60 dhibco karti (osp) wuxuuna soconayaa 1-3 sano. Tababarku wuxuu ka kooban yahay qaybo ikhtiyaari ah:

- Xoojinta kartida xirfadeed 0-25 osp
- Diyaarinta nolosha shaqada 0-20 osp
- Xoojinta xirfadaha waxbarasho 0-15 osp
- Qaybaha kale ee ikhtiyaariga ah ee waxbarashada 0-20 osp

Waxbarashada af-finnish ey ku baxeysaa.

## • Dalbasha

- Codsii wadajir ah (yhteishaku) oo guga. Waxaan ku lug leenahay raadinta wadajirka ah ee waxbarashada gaarka ah ee xirfadaha. Codsiga wada jirta ah oo ku saabsan tababar xirfadeed ayaa loo raadin doonaa iyadoo loo baahan yahay taageero gaar ah.
- Dalbasha sanadka dhan soconeyso. Waad codsan kartaa boos banaan sanadka oo dhan raadinta joogtada ah isagoo socdo. Codsiga joogtada ahi wuxuu ku habboon yahaydadka horey wax usoo baran.
- Codsigu wuxuu u baahan yahay lifaaqyo, kuwaas oo tilmaamaya baahida loo qabo taageero gaar ah.

## Goobtayada TELMA

Espoo, Helsinki (Itäkeskus, Lassila, Pasila, Tenholantie), Lohja, Porvoo iyo Vantaa

Macluumaad dheeraad ah: tel. 040 630 0028 / Adeegyada goobidda (Hakupalvelut)